

Safeguarding Kids Together (SKT)

Fact sheet for parents and carers

Wada Ilaalinta Carruurta

Warqada xaqiiqda ee loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta

Wax ku saabsan Wada ilaalinta Carruurta (SKT)

Dugsiyadu waxay leeyihiin macluumaad kala duwan oo lagu caawinayo ilmo kasta si uu u gaaro ilaa heerka ugu sareeyo ee uu gaari karo. SKT, waxaa heli kara dhamaan dugsiyada dadweynaha ee NSW, oo ku bixiya tallo takhasus leh gudaha, barnaamijyo iyo taageero lagu caawinayo dugsiyada si ay uga hadlaan dabeecada khatar qaadashada sare ee ardeyda. SKT waxay caawisaa:

- Dhisida jawi dugsi adkeysa leh oo cid waliba ku jirto.
- Aqoonso ardeyda laga yaabo inay jilicsan yihiin oo sii taageerada ku haboon.
- Maaree oo ka jawaab shilalka xaaladaha degdegta ah.

Wada shaqeynta si loo taageero dadka dhalinyarada ah

Qodobdo badan ayaa horseedi kara in ardeygu noqdo mid u nugul ka hawgelida dabeecadaha khatartoodu koreyso, sida u xoog sheegashada, oo ay ku jirto online ka ugu xoog sheegashada; la dagaalid jir ahaaneed; wax isyeelid nafsad ahaaneed; si xun u isticmaalka walxaha iyo la shaqeynta ururada kale ee dhibka badan iyo dembiilayaasha.

- Si la mid ah dugsiyada kale, waxaad ku jirtaa boos gooni ah oo aad ku ogaaneysid isbedelada weyn ee dabeecada ilmahaaga, iyo inaad ka caawisid inaad caawimaad raadsatid. Haddii aad ka dareentid isbedelo ilmahaaga dabeecadiisa, ama ilmahaagu uu kula wadaago macluumaad kuu horseeda inaad ilmahaaga saluugto, fikradahaan soo socdaa waxaa laga yaabaa inay ku caawiyaan.

Si degan u dhageyso oo hel sheekadoo dhameystiran. Ku dhiirigeli ilmahaagu inuu hadlo oo una sheeg in caawimaad raadsashadu iyo talladu ay yihiin wax hagaagsan.

Su'aalo weydii si aad u heshid faahfaahin dheeraad ah haddii aad u baahan tahay: waa kuma, maxay, xaggee, goorma. Weydii ilmahaaga waxay rabaan inay sameeyaan – iyo waxay rabaan inaad adigu sameysid. Waxaa laga yaabaa inuu ilmahaagu yara walaac ku jiro si aad adigu ula hadasho shaqaalaha dugsiiga.

Ka wada hadla fikrada oo hubanti ka sii iyaga in caawimaad ka raadsashada iyo tallada dugsiiga inay caawineyso.

La wadaag macluumaad ka khuseeya dugsiiga. Ballan sameyso si aad ula kulanto macalinka dugsiigaaga, haddii aad u baahan tahayna, weydii inaad la hadashid maamulaha.

Hey diiwaanka kulanka dugsiiga iyo siyaalaha aad u wada shaqeyn doontaan si aad u xalisaan arinta.

La wada shaqeynta dugsiiga waa sida ugu wanaagsan ee lagu caawin karo in la xaliyo arimaha. Haddii aad qabto dareen daran oo aad saluugsan tahay waxyaala ku saabsan amaanka ilmahaaga, la xiriir booliiska.



I Wasaaradda Waxbarashada ee NSW

Qaar ka mid ah qodobada ilaalinta ee ugu xoogga badan ee dadka dhalinyarada dhexdooda waa ku xirnaanta iyo lahaanshaha qoyska, da'dooda iyo dugsiga.

Waa maxay waxyaalaha ka midka ah siyaalaha aad u caawin kartid ilmahaaga?



Ku lug yeelo oo sii ilmahaaga fursado uu kugula wadaago adiga, macluumaad ku saabsan nashaadkoodii maalmeed, ardeyda da'dooda ah iyo nolosha dugsiga. Tani waxay kaa caawineysaa inaad ka warheysid meesha uu ilmahaagu taagan yahay, cidday la socdaan, iyo waxay qabanayaan.



Ku dhiirigeli ilmahaagu inuu ka qaybqaato nashaadka siinaya dareen wax la haansho iyo meel ay xoogooda ku saaraan waxay xiisaynayaan. Tusaale, cayaaraha, jilitaanka fanka, hiwaayadaha iyo naadiyada habeysan.



Noqo mid ka warqaba internetka oo fahma faa'iidooyinka iyo khasaaraha ku lugta leh isticmaalka ilmahaaga ee qalabka elektarooniga ah, sida kumbiyuutarada, tablet ka, taleefanka gacanta ee casriga ah oo ka caawi ilmahaagu inuu u isticmaalo qalabkooda si garasho leh.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ka caawinta ilmahaagu inuu yeesho khibrad online oo uu ka helo amaana ah booqo websaytka eSafety ee esafety.gov.au/



Noqo door ku dayasho leh adoo la sameysanaya xiriir wanaagsan oo tusaya ilmahaaga sidii ay si muhiim ah uga fekeri lahaayeen macluumaadka.



Ogsoonow isbedelada dabeecada ilmahaaga oo caawi inay amaan dareemaan si ay kuula wadaagaan fikradahooda iyo dareenkooda adiga.



Dhiirigeli inaad la yeelato wada hadal furan oo daacad ah ilmahaaga si ay u bartaan wax ku saabsan oo u fahmaan dadka kale aragtidooda.

Dhageyso waxa ilmahaagu uu saluugsan yahay oo iskuday inaad fahamtid fikradooda. Xitaa haddii aadan ku raacsaneyn waxa ilmahaagu uu leeyahay, waa muhiim inay ogaadaan in la aqbalay iyo inaad halkaas u joogtid si aad u caawisid.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Haddii aad jeclaan lahayd wixii macluumaad dheeraad ah fadlan la xiriir dugsiga xaafadaada. Haddii aad u baahan tahay turjumaan fadlan wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjubaan luuqadaada.

U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka aad dooneysid inaad wacdid xiriiriyahaana soo gelin doona Khadka turjumaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Jeegaree qaarka mid ah weysaytada la heli karo

- Beyond Blue wuxuu bixiyaa macluumaad iyo taageero caawineysa qof kasta inuu gaaro caafimaadkooda maskaxeed ee ugu wanaagsan uguna suurtagalsan websaytka ah beyondblue.org.au
- Websaytka NSW ee ka hortaga u xoog yeelashadu wuxuu siiyaa macluumaad shaqaalaha, ardeyda iyo waalidiinta si looga hortago looguna jawaabo u xoog yeelashada ardeyda websaytka ah antibullying.nsw.gov.au
- Hagitaanka iyo ilmaha macluumaadka amaanka online ka ah ee la xiriira waxyeelada internetka waxaa laga heli karaa websaytka Guddoomiyaha eSafety ee esafety.gov.au

